

NSW Health Factsheet - Somali

Adeega ay bixiyaan Rugaha Caafimaadka Xabadka/Adeegyada Kontoroolka iyo Ka hortaga Tiibiida

**Services provided by
Tuberculosis Prevention and
Control Service / Chest Clinics**

NSW waxay leedahay netwaaga ah Rugaha Caafimaadka Xabadka/Adeegyada Kontoroolka iyo Ka hortaga Tiibiida (TB) oo ku yaal dhammaan gobolka. Netwaagu wuxuu u qasdayaa inuu bixiyo adeeg la isticmaali karo oo dhaqan ahaan ku haboon oo waxayaalo badan kulansada dhammaan. Ujeedooyinkayaga waxaa weeye in la daaweeyo TB, in la yareeyo jirada TB iyo in laga hortago ku fidida TB bulshada dhexdeeda.

Kuwan soo socda waa qaar ka mid ah adeegyada bilaashka ah ee s qarsoodiganana ah ee ay bixiso Netwaaga TB.

Qiimeynta iyo wiisitada TB

- Baaritaan ayaa lagu sameeyaa kiisaska TB ee laga shakiyo
- Baaritaanka maqaarka ee infekshinka TB aan firfircooneyn ee (LTBI)
- Xiriiri iyo/ama samee iskiriingareyn iyo qiimeynta dadka xiriirka dhow la la TB infekshinka leh
- Adeegyada baaritaanka cudurada iyo raajatada ee baaritaanka caafimaadka ee la xiriira TB
- La tallinta caafimaad ee bukaanka oo ay ku jirto isbitaal jifinta iyo daryeelka bulshada
- La tallinta caafimaadka ee xiriirka la leh qof qaba TB, bulshada iyo aqoon yahanada daryeelka caafimaadka
- Iskiriingareynta iyo la socodka caafimaadka shaqaalaha daryeelka xaaladooda TB ahaaneed

Daaweynta iyo maareynta

- Xiriirinta qorshayaasha daaweynta shakhsiyeed
- Ku kormeerida daaweynta TB rugta caafimaadka, guriga ama goobta shaqada
- Daaweynta TB infekshinka leh ee aan firfircooneyn
- U habeynta turjumaanada Daryeelka Caafimaadka arimaha TB la xiriira.

Ballan qaadka Caafimaadka

- Qiimeynta iskiriingareynta, dabagalka, la socodka iyo waxbarashada dadka leh ballanqaadka Caafimaadka TB (TBU). TBUs waxaa siiya Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada dadka soogaleya Australiya qiimeynta raajada xabadka ee u baahan in la dabagalo.

Iskiriingareynta qaxootiga

- Qiimeynta iyo iskiriingareynta carruurta qaxootiga iyagoo lala shaqeynayo adeegyada kale ee caafimaadka

Tallaalka BCG

- Tallaalka BCG sida lagu talliyo koox la doortay oo khatar ugu jirta inay TB qaadan

Adeegyada la talinta iyo waxbarashada

- Sii la tallin iyo waxbarasho dadka bukaanka ah, aqoonyahanada daryeelka caafimaadka iyo bulshada wixii ku saabsan ka hortaga cudurka, daaweynta iyo maareynta iyo iskiriingareynta xiriirka

MACLUUMAADKA GUUD

Isticmaalida adeegyada

Waxaa looga baahan doonaa ballan adeegyada badidooda. Si aad ula xiriirto adeega Caafimaadka ee kuugu dhow eeg faahfaahinta bogga xaggiisa hoose ku taal

Bedelida ballamada

Haddii aadan awoodin inaad ballanta ilaaliso, fadlan wargeli Rugta caafimaad si wakhtigaas loo siiyo qof kale oo u baahan ballan deg deg ah. Waxaa lagu sameyn karaa maalin iyo taariikh kale oo kugu haboon

Dib u dhac wakhtiyada ballanta

Daldaal kasta waa la sameynayaa si laguugu arko wakhtiga ballantaada laakiinse waxaa laga yaabaa inay jiri doonaan wakhtiyo aysan taasi suurto gal ahayn sababo awoodeena ka baxsan awgood: tusaale xallaad deg deg ah, waxaa laga yaabaa in dakhtarka looga yeero rugta caafimaadka

Adeegyada gurigaaga

Bukaanada qaarkood oo qaata daawada TB waxay fuliyaan shuruuda guri ku booqashada. Kalkaaliyaha ayaa ku siin doona wakhtiga markaad isaga/iyada rajeynayso. Si kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inay jiraan wakhtiyo ayna tani suurto gal ahayn sababtoo ah ballamo kale oo aan hore loo saadaalin

Fadlan hore u wargeli kalkaalisada haddii aadan guriga joogi doonin wakhtiga lagu sameeyey

Nabadgelyada shaqaalaha

Nabadgelyada shaqaalaheena muhiim ayey noo tahay saa daraadeed waxaan ku weydiinaynaa iskaashi caawinta si loo hubiyo inay gurigaaga u soo booqan karaan si ammaan leh. Waxaan ku weydiinaynaa inaad dhammaan xayawaanka xirto marka kalkaalisadu ay ku soo booqaneyso. Booqashada ugu horeysa ee guriga, shaqaalaheenu wuxuu jeegareyn doonaa si uu u arko inay jiraan wax dhibaatooyin ah sida musqul aan sineyn oo laga yaabo inaad ku kufto. Waanu ka noqoneynaa booqashooyinka guriga haddii aan u aragno inaysan ammaan u ahayn shaqaalaheena waxaana kuu sameynaynaa wax kale oo bedel ah si daawadaadu u sii socoto.

Kaadhka Medicare looma baahna adeeg kasta oo TB

Soo gudbin had iyo jeer ma aha lagama maarmaan

Xagga kale ka eeg liiska Adeegyada Kontaroolka iyo Ka hortaga Qaaxada/Feeraha /Rugaha caafimaadka Xabadka ee ku yaal NSW.